

Hadii loo baahdo waxaad xaq u leedahay adeega turjumaanka luqadda. Fadlan na soo war gali baahidaada turjumaanka markaad qabsaneyso balantaada. Shaqaalaha daryeelka caafimaadka ayaa kadib kuu diyaarin doona turjumaan ka socda hay'adaha turjumaada.

## **Daryeelka ilkaha**

Daryeelka ilkaha ee dadweynuhu wuxuu awooda saara daryeelka ka hortaga ah iyo saxada fiicanan ee ilkaha.

### **Daryeelka ilkood oo dadka oo dhan ah**

Waxa jira ilaa 24 rugood oo ku yaala 15 xarumood oo gobolka ah. Shaqada Adeega Guud ee Ilkaha Bulshada ee Swiidhan waxa weeye caafimaadka ilkaha taas oo ay micnaheedu tahay daryeelka ilkaha ee carruurta, da'yarta iyo dadka waaweyn.

### **Qiimeynta kharashka**

Waxaad xaq u leedahey qiimeyn kharashka intaan lagu bilaabin daaweynta. Dhakhtarku waxay xaq u leeyihiin inay lacag kaa qaadaan markay baadhitaanka iyo qiimeynta sameynayaan taas oo sal u ah qiimeynta kharashka.

### **Booqashada daryeelka ilkaha**

Dadka waa weyn, ama kuwa buka iyo kuwa laxaadka la' waxay heli karaan dareel ilkaha oo gurigooda lagu soo booqdo.

### **Carruurta iyo dhalinyarada**

Daryeelka ilkuhu waa kuu lacag la'aan ilaa inta 19 sano da'daadu ay gaadhayso.

### **Daryeelka ilkaha ee takhasuska ah**

Adeega Guud ee Ilkaha Bulshada ee Swiidhan waxay ku leeyihiin gobolka shan rugood oo daryeelka ilkaha ee khaaska ah kuwaas oo qaabila bukaan socodka u baahan daryeel ilkaha oo qalafsan.

### **Miyaad ka cabsi qabtaa dhakhtarka ilkaha?**

Ciyaadada qaarkood ayaa leh aalado gaar ah oo ku caawin kara.

### **Doorashada cad ee dhakhtarka ilkaha ee carruurta iyo dhalinyarada**

Waxa ka jira Gobolka Kronoberg doorashada xorta ah ee dhakhtarka ilkaha oo carruurta iyo dhalinyaradu saddex iyo 19 sano ah. Waxa aad si xor ah u kala dooran kartaa Adeega Guud ee Ilkaha Bulshada ee Swiidhan, rugaha daryeelka ilkaha ee gaarka loo leeyahey iyo dhakhaatiirta ilkaha ee gaarka loo leeyahey ee daaweeya carruurta iyo dhalinyarada.

Hadii loo baahdo waxaad xaq u leedahay adeega turjumaanka luqadda. Fadlan na soo war gali baahidaada turjumaanka markaad qabsaneyso balantaada. Shaqaalaha daryeelka caafimaadka ayaa kadib kuu diyaarin doona turjumaan ka socda hay'adaha turjumaada.

Daryeel ilkaha ee ka hortaga ah - Daryeelka caafimaadka ilkaha oo qiime go'an ah

Waxaad heli kartaa daryeelka ilkaha oo qiimo go'an ah. Caafimaadka ilkahaaga ayaa xukumaaya qiimaha heshiiskaaga waxaaneey shaqeynayaan mudo saddex sano ah. Wax dheeraad ah ka akhriso waxa ka midka ah daryeelka ilkaha ee ka hortaga ah: [www.frisktandvardkronoberg.se](http://www.frisktandvardkronoberg.se) ama la hadal dhaktarkaaga ilkaha

Warbixinta daaweynta ilkaha waxa aad ka helaysaa [www.1177.se](http://www.1177.se). Halkan waxa laga oo aad ka heli kartaa warbixin la turjumay.